DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA — الجريدة الرسمية — RASMIGA

DAWLAD A PUNTLAND EE SOOMALIA — لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 37-aad. Garowe 15. 12.2017 — Lam.12.

Faafintabilwalbasoobaxda — جريدة الشهرية

*QaybtFaafintaRasmiga ah eeMadaxtooyadaDawladda Puntland*

QiimuhuwaaSh.So 10,000 rukunwalba . SanadkiiwaaSh.So 170,000 dalkagudihiisa, dalkadibaddiisaSh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyaywuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaanF.Rhalkiisadariyowixii ka yarwaaSh.So 3,000, rukunkaiyoqoritaankawaxaa la waydiistaaqeybtamaamulkaFaafinta rasmiga ah. Lacagtawaxaalagubixinayaaxafiiskacanshuurahabarrigaeewasaaraddamaaliyadda.

---

TUSMADA

QaybtaKoowaad

Ansixinta Xeerka gudiga sare ee garsoorka puntland.

Qaybtalabaad

Xeer

Waxba ma leh

QeybtaSaddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

*Xeer LR 12. ee 15/12/2017, kuna saabsan ansixinta Xeerka Gudiga sare ee Garsoorka Puntland.*

Dawladda Puntland ee Somaliya | Puntland State of Somalia

Xeerka Lr12. ee16/12/2017, kuna saabsan ansixinta Gudiga sare ee Garsoorka puntland.

Madaxweynuhu,

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta GolahaWakiilada Puntland eeSummad XGGW/DPLS/108/2017 Garowe, jimce. Date:30/11/2017;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Gudigani u leeyahay dawladda puntland;

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

GolahaWakiiladu waxay ansixiyeen Gudiga sare ee golaha Garsoorka Puntland.

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa XafiiskaMadaxweynaha, XafiiskaXoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyoXafiiskaGaryaqaankaGuud ee DPLS.

### Qodobka 3-aad

Dhaqan galka Xeerkan Gudiga sare ee Garsoorku wuxuu noqonaya marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee DawladdaPuntland, cid kastana ay waajib ku tahay inay dhawrto,kụna dhaqanto

**Prof Cabdiweli maxamad Cali Gaas.**
**MadaxweynahaDawladd apuntland.**

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

---

*Ref:*-XGGW/DPL/ 108 / 2017 Garoowe, Khamiis Date:- 30/11 /2017

Ku:-Madaxweynaha DPL Garoowe

Ujeeddo:-**Ansixinta Xeerka Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka Puntland**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64-aad**

**MARKUU ARKAY:** Soo gudbinta Madaxweyne kuxigeenka DPL **Ref: MWK/DPS/456/2017eeNovember06/2017** kuna saabsan soo gudbin AnsixinXeer

**MARKUU TIXELIYEY:** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Guddiga sare ee Maamulka Garsoorka Puntland.

**MARKUU ARKAY:** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhigii 40-aad fadhigii14-aad ee 19/11/2017 Xeerka Guddiga sare ee MaamulkaGarsoorka Puntland.

**Wuxuu Guddoomiyey:**

**Ansixinta Xeerka Guddiga sare ee Maamulka Garsoorka Puntland.**

Allaa Mahad Leh

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Guddomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

# Xeerka Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka Puntland

Garoowe, November/2017

## Qodobka 1-aad

## Guddiga Sare ee Garsoorka

Guddiga Sare ee garsoorku waa kan ugu sarreeya maamulka Garsoorka ee dawladda Puntland iyo ilaalinta madaxbannaanidiisa.

## Qodobka 2-aad

## Xarunta Guddiga Sare

Xarunta Guddiga sare ee garsoorka waa Caasimadda Dawladda Puntland ee Garoowe, waxayna awooddiisu ku baahsan tahay Puntland oo dhan.

## Qodobka 3-aad

## Xubnaha Guddiga Sare ee Garsoorka

1. Xubnaha Guddiga Sare ee maamulka garsoorka waxay ka kooban yihiin:-
   - B. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare oo isla markaasna noqonaya guddoomiyaha Guddiga Sare ee Garsoorka.
   - T. Xeer-ilaaliyaha Guud.
   - J. Saddex garsoore oo ka tirsan Maxkamadda Sare.
   - X. Labo garyaqaan oo laga soo xulayo dadweynaha.
2. Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Garsoorku wuxuu kala talinayaa Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka magacaabidda xubnaha kale ee isla guddiga Sare ee Garsoorka.
3. Dhammaan xubnaha uu ka kooban yahay Guddiga Sare ee Garsoorka waxaa lagu magacaabayaa dekreeto Madaxweyne.

## Qodobka 4-aad

## Shuruudaha ka mid noqoshada xubnaha Guddiga Sare ee Garsoorka

Guddiga Sare ee Garsoorka Puntland waxaa xubin ka noqon kara:

1. Muwaadin Puntlander ah oo haysta kuna dhaqma Diinta Islaamka.
2. Qof aan maxkamadi ku xukumin dembi culus oo dhaqangal noqday shantii (5) sano ee ugu dambaysay.
3. Qof aan da`diisu ka yareyn afartan (40) sano.
4. Sharciyaqaan haysta shahaado culuumta sharciga oo uu ka qaatay Jaamacad la aqoonsan yahay lehna waayo-aragnimo garsoor ama qareennimo oo aan ka yareyn shan (5) sano.
5. Qof lagu yaqaan hufnaan iyo daacadnimo, isla markaasna aqoon iyo karti u leh arrimaha sharciga.

## Qodobka 5-aad

## Luminta xubinnimada Guddiga Sare ee Garsoorka

1. Xubinnimada Guddiga Sare ee Garsoorka waxaa lagu waayi

   karaa marka ay sugnaato mid ka mid ah sababaha soo socda:

   B. Haddii xubintu lumiso mid ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay.

   T. Haddii xubintu geeriyooto amase ay gudan Kari weydo xilkeeda xubinnimo, sabab kasta ha ku timaadee.

   J. Haddii xubintu istaqaalo qoraal ah keento kana aqbalo guddoomiyaha Guddiga Sare ee Garsoorka.

   X. Haddii xubintu ku xadgubto dastuurka iyo qawaaniinta kale ee ay ku dhaqanto dawladda Puntland.

   Kh. Haddii xubinta maxkamadi ku xukunto fal-dembiyeed culus oo dhaqangal noqday.

2. Lumintα xubinnimada ka mid ahaanshaha xubnaha Guddiga Sare ee garsoorka, waxay dhaqngal noqonaysaa haddii aqlabiyadda xubnaha Guddiga Sare ee Garsoorku u codeeyaan inay sugnaatay mid ama ka badan shanta xaaladood oo ku xusan faqradda koowaad ee isla qodobkan, isla markaasna lagu soo saaro dekreeto Madaxweyne.

## Qodobka 6-aad

## Xilgudasho La'aan

Marka Guddoomiyaha Maxkamada sare gudan kari waayo xilka guddoominta guddiga, sabab kasta ha ku timaadee, waxaa si ku meel gaar ah xilkii Guddoomiyanimadu ugu wareegayaa Garsoore ka tirsan Maxkamada sare oo darejo ahaan ku xiga Guddoomiyaha Maxkamda sare.

## Qodobka 7-aad

## Awoodaha iyo xilalka Guddiga Sare ee maamulka garsoorka

1. Guddiga Sare ee maamulka garsoorku wuxuu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:-

   B. Shaqo-qorista, magacaabidda, ruqsaynta, beddelidda. dallacsiinta, anshax-marinta garsooreyaasha maxkamadaha rafcaanka, garsoorayaasha maxkamadaha darajada koowaad, xeer-ilaaliyaasha gobollada iyo dhammaan shaqaalaha kale ee hay'adda garsoorka.

   T. Diyaarinta hindisyada sharciyeed ee la xiriira shaqada, maamulka iyo hawl-wadeennada garsoorka iyo u gudbinta hindisayaashaas Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda si uu uga ansixiyo Golaha Xukuumadda.

   J. Samaynta iyo maamulidda xarumo tababbarro garsoor, si loo hormariyo heerka aqoonta iyo xirfadda hawl-wadeennada, kaaliyeyaasha iyo gaarsiyeyaasha garsoorka iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Caddaaladda.

2. Go`aannada Guddiga Sare ee maamulka garsoorka ee ku saabsan shaqo-qorista, magacaabidda, ruqsaynta iyo dallacsiinta garsooreyaasha maxkamadaha rafcaanka, garsoorayaasha maxkamadaha darajada koowaad iyo xeer-ilaaliyaasha gobollada, waxay ku soo baxayaan kuna dhaqan-geleyaa dekreeto Madaxweyne.

## Qodobka 8-aad

## Madaxbannaanida Hay-adda Garsoorka

1. Guddiga Sare ee maamulka Garsoorku wuxuu u xilsaaran yahay Ilaalinta Madaxbannaanida Garsoorka iyo dhowrista sharafta iyo haybadda hawl-wadeennada ku hawlan shaqada garsoorka.
2. Garsoorku wuxuu ka madaxbannaan yahay laamaha kale ee dawladda sida Golaha sharci-dejinta iyo Golaha xukuumadda marka hawlwadeennada garsoorku ay gudanayaan xilkooda.
3. Hawl-wadeennada garsoorku waxay u hoggaansamayaan sharciga oo keliya.

## Qodobka 9-aad

## Hubinta habsami-u-socodka shaqada Garsoorka

1. Guddiga Sare ee maamulka Garsoorka waxaa kaloo waajibaadkiisa ka mid ah hubinta habsami-u-socodka shaqada garsoorka.
2. Guddiga Sare ee garsoorku wuxuu awood u leeyahay inuu kormeero, baaro lana xisaabtamo dhammaan xafiisyada xeer-ilaalinta gobollada, garsoorayaasha maxkamadaha rafcaanka iyo kuwa darajada koowaad oo qaada go`aanna ka soo saara dacwooyinka ciqaabta, madaniga, shaqada, arrimaha qoyska, heshiisiinta, cabashooyinka iyo wax kasta oo hoos imaanaya ikhtisaaska maxkamadahaas.
3. Guddiga Sare ee garsoorku wuxuu si gaar ah ugu kuur-gelayaa una hubinayaa sida loo maamulo loona xereeyo dhammaan lacagaha ay qabtaan maxkamaduhu iyo xafiisyada xeer-ilaalinta sida

canshuurta dawladda, ganaaxyada, ajuurada iyo nooc kasta oo ah dakhli soo xeroodey.

## Qodobka 10-aad

## Soo gudbinta go'aannada Maxkamadaha

1. Garsoore kasta wuxuu Guddiga Sare ee maamulka garsoorka u soo gudbinayaa, saddexdii biloodba mar, nuqul ka mid ah xukunnada iyo go`aannada kale oo uu soo saaro, si loo ogaado sida garsoorayaashu u kala hawlqabad iyo dadaal badan yihiin, taas oo gundhig u noqon karta kala hormarinta, dallacsiinta garsoorayaasha iyo la xisaabtankooda haddii dhaliillo muuqdaan.
2. Xoghayaha Guddiga Sare ee Garsoorka ayaa u xilsaaran dabagalka iyo sugidda fulinta waajibaadka ku xusan faqradda koowaad ee isla qodobkan iyo la socodsiintooda Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Garsoorka.

## Qodobka 11-aad

## Hannaanka Kormeerka Guddiga Sare ee Garsoorka

1. Guddoomiyaha Guddiga Sare ee maamulka garsoorku wuxuu magacaabayaa, markii ay la habboonaato, saddex xubnood oo ka tirsan Golaha Sare ee Garsoorka , xubnahaas oo soo kormeeraya Gobollada iyo degmooyinka una kuurgelaya habsami-u socodsiinta hawlaha garsoorka iyo baahida ka jirta maxkamadaha, xafiisyada Xeer-ilaalinta Gobollada, xafiisyada kaaliyayaasha iyo gaarsiiyayaasha.
2. Xubnaha ka socda Guddiga Sare ee Garsoorka waxay natiijada kormeerkooda iyo baaritaankooda u soo gudbinayaan Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka oo isaguna keeni doona shirka ugu horreeya ee Guddiga Sare ee garsoorka si go'aan kama dambays ah looga gaaro waxyaalaha la soo gudbiyey oo wax ka qabadka u baahan.

## Qodobka 12-aad

## Warbixin

Guddoomiyayaasha maxkamadaha rafcaanka, guddoomiyayaasha maxkamadaha darajada koowaad iyo xeer-ilaaliyaasha gobollada waa in mid kasta soo diraa warbixin ku saabsan hawl-qabadka iyo caqabadaha ay la kulmeen maxkamadaha iyo xafiisyada ay madaxda ka yihiin lixdii biloodba mar, isla markaasna sanad kasta aakhirkiisa soo gudbiyaan warbixin guud oo tifaftiran laga bilaabo sanadka 2017.

## Qodobka 13-aad

## Shir caadi ah

1. Golaha Sare ee maamulka Garsoorku wuxuu yeelanayaa shir caadi ah bishii laba jeer. Haddii shirku qabsoomi-waayo, sababtu wax kasta ha noqotee, guddoomiyaha Guddiga Sare wuxuu qabanayaa waqti kale oo ku habboon toddobaad gudihiis.
2. Ajendada (mawduucyada) laga wada hadlayo waxaa shir kasta keenaya Guddoomiyaha Guddiga Sare ee garsoorka. sidoo kale xubin kasta oo ka tirsan Guddiga Sare Garsoorka waa u soo gudbin kartaa Guddoomiyaha isla guddigaas wixii ay la tahay in lagu daro Ajendaha shirka.

## Qodobka 14-aad

## Shir aan caadi ahayn

Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Garsoorku wuxuu iskugu yeeri kara shir aan caadi ahayn xubnaha Guddiga Sare ee Garsoorka toddobaad gudihiis haddii ay la habboonaato amase ay sidaas weydiistaan ugu yaraan saddex meelood labo (2/3) xubnaha guddiga Sare ee Garsoorku ka kooban yahay.

## Qodobka 15-aad

## Ansaxnaanta Shirarka Guddiga Sare ee Garsoorka

Shirarka Guddiga Sare ee Garsoorku waxay ku ansaxayaan marka uu goob-joog yahay guddoomiyaha Guddigu iyo ugu yaraan afar (4) xubnood oo kale oo ka mid ah xubnaha uu ka kooban yahay Guddiga sare ee Garsoorka.

## Qodobka 16-aad

## Go`aannada Guddiga Sare ee Garsoorka

Go`aannada Guddiga Sare ee Garsoorka waxay ku ansaxayaan aqlabiyadda (cod hal dheeri ah) xubnaha Guddiga Sare ee Garsoorka oo uu ku jiro Guddoomiyaha isla Guddigaas.

## Qodobka 17-aad

## Xoghayaha Gudddiga Sare ee Garsoorka

1. Kaaliyaha Maxkamadda Sare ayaa noqonaya Xoghayaha Guddiga Sare ee Maamulka Garsoorka.
2. Xoghayaha Guddiga Sare ee Garsoorku wuxuu u xilsaaran yahay diiwaangelinta, xafidaada iyo gaarsiinta dhinacyada ay khuseeyaan dhammaan go`aannada, amarrada iyo qoraaladda kale oo uu soo saaro Guddiga sare ee Garsoorka.
3. Xoghayaha Guddigu ma laha cod marka xubnaha Guddiga Sare ee Garsoorku codeynayaan, hase yeeshee, kama reebana in uu soo jeediyo talooyin wax-ku-ool u noqon kara mawduucyada markaas la falaanqeynayo.

## Qodobka 18-aad

## Xasaanadda

Garsoorayaasha maxkamadaha rafcaanka iyo kuwa darajada koowaad *iyo xeer-ilaaliyaasha gobolada lama xiri karo haddii aan* lagu qaban iyagoo faldembiyeed gacanta kula jira, lama baari

karo deegaankooda iyo gaadiidkooda midna dacwadna laguma oogi karo haddii aan Guddiga Sare ee Garsoorku oggolaan codsi ka yimid xeer-ilaaliyaha Guud ee Puntland oo la xiriira in xasaanadda laga qaado sida uu qabo qodobka 131-aad faqraddiisa 5-aad ee Dastuurka dawladda puntland.

## Qodobka 19-aad

## Muddada Xilka Guddiga Sare ee Garsoorka

Muddada Xilhaynta xubnaha Guddiga Sare ee Garsoorka waa Shan (5) Sano laga bilaabo maalinta Madaxweynuhu dekreeto ku soo saaro Magacaabista Xubnahaas.

## Qodobka 20-aad

## Dhaarta

Dhammaan garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha hay'adda garsoorka waxay marayaan dhaarta ku xusan qodobka 132-aad ee dastuurka dawladda Puntland inta aysan qaban xilkooda.

## Qodobka 21-aad

## Burin

Waxaa la buriyey xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin xeerkan.

## Qodobka 22-aad

## Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka Golaha Wakiiladu Ansixiyo, Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland**